

# Qeybaha uu ka koobanyahay Dersida Deegaanka



Dersida Deegaanka waa hannaan guud oo ay sameeyso magaalada Minneapolis iyo dowlada Gobolka Minnesota inta aan la ansixin mashaariicda. Hannaanka Dersida deegaanka waxuu maraa saddex marxaladood **Qiimeyn Qoraal ah oo laga sameeyo Deegaanka, Soo bandhigida Bulshada** si ay tallo ama odhaah ugu darsadaan iyo **go'aaminta ugu dambeysa**. In Laga talo galiyo Shacabka hanaan Dersida deegaanka waxey horseedi kartaa horumar la hubo, isla markaasna shacabka ay kula xisaabtami karaan dowlada. Ka Qeybqaadashada bulshada ee dersida deegaanka wa qaab awood badan oo looga hortagi karo mashaariic aan deegaanka u fiicneyn, balse dersida kaliya manoqon karto hanaanka lagu yeeli karo ama lagu diidi karo mashaariicda.

## 1) the EAW

### (qiimeyn qoraal ah oo laga sameeyo Deegaanka)

Talaabada ugu horeesa wa in la diyaariyo qiimeyn deegaanka ah oo qoraal ah taas oo uu diyaarinayo qorshe soo jeediye, qoraalkaas yar wa inuu ka koobnaadaa qorshaha dhulka, Mashruuca waxyaabaha uu ka koobanyahaya, ogalaanshaha loo baahanyahay, in uu mashruucu uu qeyb ka yahay mashruuc dhisme oo balaaran iyo qaar kale. Warbixinta qoraalka ah wa in sidoo kale ay qeexdaa hadii uu mashruucu u baahanyahy inu isticmalo biyo iyo dhul iyo suurtagalnimada hawada, dhawaaqa iyo diqowga hawada. diyaarinta warqadaan qiimeynta ah waxey qaadataa bilo si loo diyaariyo.

## 2) Aragtida dadweynaha

Marka la dhameeyo qiimeynta qoraalka ah, waxaa bilaabata marxalada aruurinta fikradaha dadweynaha, waxaa u furan dadweynaha, qofkasta ama ururada/shirkadaha iney ku darsadaan talooyinkooda, cabashooyinkooda ama fikradaha kamaqan qiimeynta qoraalka ah. Talooyinka muujinaya xal u helida cabashooyinka khaaska ah oo an aheyn kuwa guud ama qaab cayiman oo lagu xalin karo oo looga hortagi karo dhibka deegaanta wa muhiim.

## 3) Go'aanka ugu dambeeya

Kadib marka y xiranto aruurinta aaraada dadweynaha , qorshe soo jeediyaha waxuu go'aansanayaa in mashruucu u baahanyahay qiimeyn iyo dersid qoto dheer, taas oo qaadan karta sanado in la dhameeyo, ama in mashruucu sidii loogu tala galay noqdo. Hase ahaatee go'aankastaba qsoo jeediyaha waa inuu ku daraa qoraalkiisa, xalna u helaa talooyinkii bulshada laga soo aruuriyay intii lagu guda jiray fikir aruurinta.